

Hadal loo wada dhanyahay laguna cambaayeynayo weerarka Al-Shabab ay ku qaadday dadka reer Muqdisho

Norway
Maraykanka
Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaiya
Midowga Yurub
Urur Goboleedka IGAD
Jaamacadda Carabta
Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda
Soomaaliya

Nayroobi, 26 Agooto 2010 – Norway, Maraykanka, Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaiya (AMISOM), Midowga Yurub, Urur Goboleedka IGAD, Jaamacadda Carabta iyo Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya waxay si kulul u cambaareynayaan weerarka joogtada ah ee ay kooxaha xagjirka ahi ku hayaan dadka reer Muqdisho. Weerrarkan bahalnimada ah wuxuu ka socdaa dhowr dhinac. Waxaana ka mid ah sida sharci darradaha ah ee loo joojinayo cuntada gargaarka baniaadanimu iyo dilka naxariis darrada ah ee loo geysto dadka aan waxba galabsan, sida weerarkii lala beegsaday Hoteel Muna ee sababay dhimashada dad badan oo rayid ah. Waxaan tacsii u diraynaa dadka dhibaataada loogu geysto dalkoo dhan iyo qoysaska ay ka geeriyooden dadkii lagu laayay weerarkii Muqdisho.

Weerrarkan sida gaarka ah loogu soo beegay bishan barakaysan ee Ramadan wuxuu ka marag kacayaan sida kuwa soo qaaday ayna inaba wax xurma ah ugu haynin nafta baniaadanka. Waxaanu si gaar ah uga welwelnahay dadka shisheeye ee dalka dagaal u jooga lana hawlgalaya Al-Shabaab si dhibaato loogu geysto dadweynaha Soomaaliyeed. Waxaa cad in kooxdani ay danaynayso keliya burburinta iyo in ummadda Soomaaliyeed lagu hayo dhibaataada.

Waxaa dhab ah in qaswadayaashu ayna guuleysanayn. Geeddisocodka nabadduna wuu ka sii socdon doonaa Soomaaliya, inkastoo kuwo laga tira badanyahay ay doonayaan inay joojiyaan. Norway, Maraykanka, Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaiya, AMISOM, Midowga Yurub, Urur Goboleedka IGAD, Jaamacadda Carabta iyo Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda waxay ballanqaadayaan inay sii wadi doonaan taageerada ay u hayaan Dowladda iyo dadka Soomaaliyeed oo ku hawlan in si dhaqso ah oo waarta loo dhammeeyo dhibaataada ka taagan Soomaaliya si ummadda Soomaaliyeed u hesho mustaqbal aaya leh.